Laga bilaabo 2026-27, yaa heli doona gaadiidka dugsiga hoose iyo dhexe?

- Laga bilaabo 2026–27, gaadiidka waxaa la siin doonaa oo keliya ardayda dhigata dugsigooda loo qoondeeyay ee xaafadda cinwaanka guriga ee ku nool in ka badan 2 mayl u-jira dugsiga, ama ardayda dhigata dugsi bakhtiyaa-nasiib ah ah 100%, ardayda hesha adeegyo gaar ah oo lagu meeleeyay dugsi aan ahayn dugsigooda loo qoondeeyay cinwaan-ahaan, ama ardayda ka soo barakacay dugsigooda loo qoondeeyay cinwaan-ahaan.

Waa maxay gaadiidka AAN LABIXIN DOONIN laga bilaabo sannad-dugsiyeedka 2026-2027?

- CCS ma siin doonto gaadiid ardayda K-ilaa 8-aad ee dhigata dugsi aan ahayn 100% dugsigooda bakhtiyaa-nasiibka loogu talagalay cinwaan-ahaan.

Dugsiyada hoose iyo dhexe ma waxay yihiin bakhtiyaa-nasiib 100% ah?

- Dugsiga Dhexe ee Farshaxanka (Arts Impact Middle School)
- Dugsiga Hoose iyo Dhexe ee (Africentric Elementary & Middle School)
- Dugsiga Diyaarinta Magaalada Columbus ee Wiilasha (Columbus City Prep School for Boys)
- Dugsiga Diyaarinta Magaalada Columbus ee Gab-dhaha (Columbus City Prep School for Girls)
- Dugsiga (Columbus Spanish Immersion)
- Dugsiga (Duxberry Park)
- Dugsiga (Ecole Kenwood)
- Dugsiga (Indianola K–ilaa 8-aad)
- Dugsiga (Oakland Park)
- Dugsiga Dhexe ee Luqadda Adduunka (World Language Middle School)

Waa maxay dugsiyada hoose iyo dhexe ee aan ahayn 100% bakhtiyaa-nasiibka ee uu saameyn doono isbeddelka gaadiidku?

Dugsiyada Dhexe (Middle Schools)

- Dugsiyada Buckeye, Champion, Dominion, Hilltonia, Johnson Park, Linden-McKinley (7–8), Medina, Mifflin, Ridgeview, Sherwood, South (7–8), Wedgewood, Westmoor, iyo Woodward Park

Dugsiyada Hoose (Elementary Schools)

- Dugsiyada Alpine, Avalon, Avondale, Berwick, Binns, Burroughs, Cassady, Cedarwood, Clinton, Colerain, Como, Cranbrook, Devonshire, Eakin, East Columbus, East Linden, Eastgate, Easthaven, Fairmoor, Forest Park, Gables, Georgian Heights, Hamilton STEM, Highland, Hubbard, Huy, Indian Springs, Innis, Leawood, Liberty, Lincoln Park, Lindbergh, Linden STEM, Livingston, Maize, North Linden, Northgate, Northtowne, Oakmont, Ohio Avenue, Olde Orchard, Parkmoor, Parsons, Salem, Scottwood, Siebert, Shady Lane, South Mifflin, Southwood, Starling, Stewart, Sullivant, Trevitt, Valley Forge, Valleyview, Watkins, Weinland Park, West Broad, West Mound, Westgate, Windsor STEM, Winterset, iyo Woodcrest

Waa maxay shuruudaha u-qalmitaanka gaadiidka ee CCS?

- Ardaydu waa inay ku nool-yihiin **in ka badan 2 mayl** oo u-jirta dugsiga xafadda guriga ee loo qoondeeyay ama dugsigooda bakhtiyaa-nasiibka 100%, ardayguna waa inuu ku nool yahay xuduudaha Dugsiyada Magaalada Columbus.

Ma jiraan wax ka reeban?

- Haa, ardayda loo qoondeeyay adeegyada gaarka ah waxay sii wadan doonaan inay helaan gaadiid, iyadoon loo eegin nooca dugsiga.

Maxaan ka fiirsanayaa/tix-gelinayaa haddii aan rabo inaan ardaygeyga ku qoro Xulashada Dugsiga?

- Qoysaska codsanaya dugsiyada bakhtiyaa-nasiibka ee aan ahayn 100% bisha Janaayo waa inay qorsheestaan gaadiid kale. Qoysasku waxay dib uga fiirsan karaan ikhtiyaarrada xulashada dugsiga ama waxay ku laaban karaan dugsigooda loo qoondeeyay iyaga oo ku salaynaya helitaanka gaadiidka.

Isbeddello noocee ah ayaa lagu sameyn doonaa gaadiidka dugsiga sare?

- **Wax isbeddel ah kuma imaanayo** gaadiidka dugsiga sare **sannad-dugsiyeedka 2026-27.** In kasta oo gaadiidka dib loo eegi karo sannadaha soo socda, haddana lama qorsheynayo wax isbeddel ah oo ay Guddiga ansixiyeen xilligan. CCS waxay sii wadi doontaa la shaqaynta la-hawlgalayaasha maxalliga ah si ay u sahamiyaan fursadaha mustaqbalka ee gaadiidka dugsiga sare.

Sidee qoyskaygu u qorsheysan karaa sanad-dugsiyeedka 2026-27?

- Si taxaddar leh u eeg hawlaha dugsiga. Hubi masaafada u dhaxaysa guriga iyo dugsiga. Cusbooneysii cinwaanada guriga haddii loo baahdo. Horey u qorsheyso gaadiidka sannad-dugsiyeedka 2026–27.

Yaan la xiriiri karaa si aan u helo xogg dheeraad ah?

- Wixii xogg dheeraad ah oo ku saabsan Xulashada Dugsiga iyo gaadiidka, fadlan la xiriir CCS ee ah Schoolchoice@columbus.k12.oh.us ama 614-365-7459